



Ugu dambeyntii la Cusbooneysiiyay: Sibteembar 14, 2020

Hagista dib-u-furida ee Gobolka oo dhan – Ciyaaraha Kuliyaadda, Ciyaaraha Xirfada aan buuxin (Semi-Professional), iyo Ciyaaraha Horyaalada yar (Minor League Sports), Ku Soo Laabashada Ciyaarta oo Xaddidan

Amarka: Lambarka Amarka Fulinta 20-27, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

Hirgelinta: Illaa iyo inta ay hagistan u baahan tahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waxaa loo hergelin karaa sida lagu qeexay Amarka Fulinta 20-27, baragaraafka 26-aad.

Khusaynta: Hagistani waxa ay khuseeysaa ciyaaraha kulliyada, ciyaaraha xirfada aan buuxin, iyo ciyaaraha horyaalada yar, tababarka iyo ciyaarta isboortiyada gaarka ah ee gobolka oo dhan.

Ciyaartoyda/Kooxaha ku sugan dibadda Oregon ee ciyaar ugu safraya Oregon waa iney raacaan hagista lagu qeexay dukumintigan.

Ciyaaraha is-taabashada buuxda leh lama oggolo in la ciyaaro xiligaan. Tababbarka iyo jimicsiyada ee ciyaaraha/isbortiska istabashada/isku dhawaanshaha buuxda leh waa la oggolyahay. Tababbarka iyo jimicsiyada, sida culeys qaadista, tababarka orodka iyo isla ciyaarida kooxda dhexdooda ah, kuma jiri karto istaabasho buuxda nooc kasta ha ahaato.

Qeexitaano: Ujeedooyinka hagistan dartood, qeexitaanada soo socda ayaa lagu dhaqmi:

- “Ciyaaraha istaabashada buuxda leh” macnaheedu waa ciyaaraha ku lugta leh shardiga ama suurtagalnimada isu soo dhawaanshaha oo joogto ah ama xiriir jireed/istaabasho ka dhex dhacda kaqeybgalayaasha, waxaana ka mid ah laakiin kuma xaddidno kubadda cagta ee Mareekanka, rugby-ga, musaaracada, u-sacab tunka, kubadda kolega, hockey-ga, qoob-ka-ciyaarka, kubada biyaha (water polo), ciyaarta lacrosse ee ragga.
- “Ciyaaraha istaabasho/isku dhawaansho yar/dhexdhexaad ah leh” waxaa ka mid ah laakiinse kuma xaddidno kubada jilicsan (softball-ka), baseball-ka, kubadda cagta, kubbadda gacanta, ciyaarta lacrosse ee haweenka, kubadda cagta ee Mareekanka.
- “Ciyaaraha aan-istaabashada lahayn” waxaa ka mid ah laakiinse kuma xaddidno tennis-ka, dabaasha, golf-ka, orodka dheer, orodka dheer ee garoonka ciyaarta iyo dibada, dheerigelinta iyo qoob ka ciyaarida aan taabashada lahayn/dhinaca lagu sameeyo

Dulmar guud:

Khatarta gudbinta fayraska COVID-19 waxa ay ku xidhan tahay dhawr arrimood oo ay ka mid yihiin:

- 1) Tirada dadka ee ku sugan goobta
- 2) Nooca goobta (gudaha mise banaanka)
- 3) Masaafadda u dhaxaysa dadka
- 4) Muddada lagu sugan yahay goobta
- 5) Heerka qalabka is-ilaalinta ee la isticmaalay (tusaale ahaan daboolada wajiga)

Hagid guud ahaan, kooxaha yaryari way ka nabdoon yihiin kuwa waaweyn; meelaha banaanka ah way ka nabdoon yihiin kuwa gudaha ah; isboortiyada xaqiijin kara masaafad ah lix (6) fuud ama ka badan oo udhaxayso dadka ayaa ka nabdoon kuwa leh isku-dhawaanshaha; muddada gaaban waxa ay ka nabdoon tahay mid dheer. Daboolada wajiga waa inay xirtaan ciyaartoyda, hagayaasha iyo daawadayaasha iyadoo la raacayo [Hagista Gobolka oo dhan ah ee Maaskrada, Waji Daboolada, Gaashaanka Wajiga](#). Maamuleyaasha iyo hagayaasha waxay u baahan yihiin in ay tixgeliyaan arrimahaas oo dhan marka ay qorsheynayaan in ay ku laabtaan ciyaaraha.

Shuruudaha Guud:

Horyaalada, kulliyadaha/jaamacadaha, hagayaasha, ciyaartoyda iyo tababarayaasha waxaa looga baahan yahay inay:

- Dib u eegaan oo raacaan [Hagida Guud ee Oregon ee Loo-shaqeeyayaasha ee ku saabsan COVID-19](#) iyo [Hagida Dib-u-furitaanka ee OHA](#) ee loogu talagalay Dadweynaha.
- Haddii ay khusayso, u hoggaansan [Hagista Waaxda Waxbarashada ee Oregon](#).
- Ka mamnuucaan shaqaalaha iyo ciyaartoyda qaba wax ah [astaamaha COVID-19](#) inay soo galaan dhismaha ama goobta cayaaraha.
- Ku dhiirrigeliyaan qof kasta, oo ay ku jiraan cayaartoyda, oo halis sare ugu jira dhibaatooyinka ka yimaada COVID-19 (tusaale ahaan, dadka qaba xaaladaha caafimaad ee joogtada ah) inaysan ka-qaybgalin wax ah hawlaha cayaaraha.
 - Haddii ciyaartoy, tabaruce ama daawade uu muujiyo astaamaha COVID-19, xubin ka mid ah shaqaalaha waa inuu weydiiyaa inay ka baxaan dhismaha, siiyo shaqsiga waji daboole, gaashaan waji ama maaskaro, iyo inuu ku caawiyo shakhsiga yareynta xiriir lalahaanshaha dadka kale ka hor inta aysan ka tagin xarunta. Si dhakhso leh jeermiska uga dil dhammaan aagagga uu adeegsaday qofka xanuunsan.
- Xiraan ilaha biyaha, marka laga reebo kuwa loogu talagalay inay buuxiyaan dhalooyinka biyaha iyada oo aanay istaabanayn dhalada iyo ishu. Ku dhiirrigeliyaan ciyaartoyda in ay horey u soo qaataan dhalooyin biyo ah oo horey loo soo buuxiyey.
- Xirtaan maaskaro, gaashaanka wajiga, ama daboolada wajiga, marka ay kaqaybqaadanayaan ciyaaro gudaha ah ama ciyaaraha bannaanka ah marka kala fogaanshaha masafo ah lix (6) fuud aanan la joogteyn karin. Daboolada wajiga

waxaa looga jeedaa in lagu badbaadiyo dadka kale haddii aad cudurka qabtid. Dadku waxay u gudbin karaan COVID-19 dadka kale xiitaa haddii aanay dareemayn xannuun. Tixraac [Hagista Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Waji Daboolada, iyo Gaashaanka Wajiga](#) si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

- Hubiyaan in dhamaan daawadayaasha xirtaan maaskaro, gaashaanka wajiga ama waji daboolada, xitaa marka ay banaanka joogaan iyadoo la raacayo [Hagista Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Waji Daboolada, iyo Gaashaanka Wajiga](#).
- Hubiyaan in nidaamyada hawo siinta si haboon u shaqeeynayaan. Kordhi hawo qeybinta ilaa inta ugu badan ee suurtoogalka ah iyada oo la furayo daaqadaha iyo albaabada, iyada oo la isticmaalayo marwaxadaha, ama qaabab kale. Ha furin daaqadaha iyo albaabada haddii sameynta sidaasi ay halis gelinayso baadqabka shaqaalaha, daawadayaasha, ama ciyaartoyda.
- Dhammaan siyaasadaha iyo macluumaadka xarumaha u sheegaan ciyaartoyda / kaqeybgalayaasha, waalidiinta, mas'uuliinta, iyo daryeelayaasha kahor inta aysan dib u bilaabin ama bilaabin xilli-ciyaareedka.

Nadiifinta iyo Jeermis-dilidda:

Horyaalada, kulliyadaha/jaamacadaha, hagayaasha iyo tababarayaasha waxaa looga baahan yahay inay:

- Si joogto ah u nadiifiyaan uga dilaan jeermiska qalabka la wadaago. Tan waxa ka mid ah, laakiin kuma xaddidno, qalabka sida ulaha kiriketka iyo teniska lagu ciyaaro. Icticmaal jeermis-dilayaasha lagu daray [Iiiska ay ansixisay Wakaalada Illaalada Bay'ada \(EPA\)](#) ee loogu talagalay fayraska SARS-CoV-2 ee sababo COVID-19.
- Shardi uga dhigaan shaqaalaha inay ku dhaqmaan nadaafad wanaagsan oo ay ku jirto u dhaqitaanka gacmhooda si joogto ah iyo daboolida hindhisashadooda iyo qufacooda. Si joogta ah gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbiriqsi, gaar ahaan marka aad taabato shay la wadaago ama aad duufsato, qufacdo, ama hindhisto. Iska ilaali inaad taabato indhahaaga, sankaga iyo afkaaga.
- Haddii saabuunta iyo biyuhu aan si sahlan loo heli karin, isticmaal gacmo nadiifiye ka kooban ugu yaraan 60-95% alkoolo. Gaarsii dhammaan gacmaha oo isku rug illaa ay ka qalalaan.
- Ku dhiirrigeliyaan ciyaartoyda in ay la yimaadaan nadiifiyayaasha gacmaha oo u gaar ah si ay u isticmaalaan. Horyaallada waxa lagu dhiirrigelinayaa in ay bixiyaan xarumo gacmo dhaqid iyo/ama gacmo nadiifiye.
- Si joogta ah u nadiifiyaan uguna dilaan jeermiska aagaga socodku ku badan yahay, iyo meelaha badanaa la taabto oo ah aagga ay geli karaan shaqaalaha iyo daawadayaasha.
- Hubiyaan musqulaha in la nadiifiyey oo jeermiska laga diley ka hor iyo ka dib waxqabad horyaaleed iyo/ama ugu yaraan labo jeer maalintii.

Kala Fogaanshaha Dadka iyo Tirada Dadka Jooga Goobta:

Horyaalada, kulliyadaha/jaamacadaha, hagayaasha iyo tababarayaasha waxaa looga baahan yahay inay:

- Ku xaddidaan tirada iskugu imaanshaha dhacdada ciyaar walba ugu badnaan 100 qof oo gudaha ah ama 250 qof oo dibada ah, oo aynan kabadan 250 qof gudaha iyo dibadaba, ama tirada dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha, iyadoo ku saleysan mugga goobta (cabirka baaxada aaga/mugga goobta), mid alle midee yar. Joogteeyaan kala fogaanshaha jireed oo ah ugu yaraan lix (6) fuud qofkiiba. Maaskaro, gaashaanka wajiga, ama daboolka wajiga waa in la isticmaalo kala fogaanshaha jireed ka sokow.
- Soosaaraan oo fuliyaan qorshe lagu xadiddo tirada daawadayaasha loo oggol yahay inay meesha soo galaan si dhammaan shaqaalaha, tabaruceyaasha, qandaraaslayaasha iyo daawadayaashu u joogteyn karaan kala fogaanshaha lixda (6) fuud.
- Xilsaaraan kormeere la qoondeeyay si loo hubiyo in daawadayaashu ay kala fogaadaan masaafu jireed oo lix (6) fuud ah, oo ay ku jirto iridaha laga soo galo, kuwa laga baxo, musqulaha iyo aag kasta oo dadku ku kulmi karaan.
 - Joogtaynta kala fogaanshaha jireed waxay si gaar ah muhiim ugu tahay dadka [gaba xaaladaha caafimaad ee raaga](#). Kooxahani halis badan ayey ugu jiraan inay si ba'an ula bukoodaan COVID-19.
- Ku dhiirrigeliyaan qof kasta oo jooga xarunta isboortiga, oo ay ku jiraan dhammaan ciyaartoyda, hagayaasha, garsoorayaasha, tabaruceyaasha iyo qandaraaslayaasha madaxa bannaan inay jir ahaan ka fogaadaan masaafu ah ugu yaraan lix (6) fuud dadka kale ee aan degganeyn gurigooda, gaar ahaan marka la joogo meelaha la wadaago.
- Marka dhacdooyin ciyaareed oo badan ay meel ka wada dhacayaan isla mar qudha, horyaalada, hagayaasha iyo tababarayaasha waxa looga baahan yahay inay:
 - Hubiyaan in ciyaartoyda iyo daawadayaasha dhacdooyinka ciyaareed aysan meel wadaagin, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobnayn musqulaha, waddooyinka gudaha dhismaha, meelaha cuntada iyo cabbitaanada laga iibsado.
 - Nadiifiyaan oo jeermiska ka dilaan meelaha badanaa la taabto, sida sidooyinka albaabada, inta u dhaxaysa ciyaaraha ama dhacdooyinka isku xiga.
 - Nadiifiyaan oo jeermiska ka dilaan meelaha dadku ku badan yihiin sida irridaha laga soo galo, kuwa laga baxo, miisaska diiwaangalinta, suuliyada iyo meelaha cuntada iyo cabbitaanka laga iibsado, inta u dhaxasya ciyaaraha iyo dhacdooyinka isku xiga.
 - Haddii kooxaha iyo daawadayaasha jooga isla dhacdo ciyaareed ay wadaagaan suuliga, albaabada galista/bixista yeyna xirin, haddii ay suurtoagal tahay, oo si joogto ah ha u nadiifiyaan oo jeermiska ha uga dilaan meelaha badanaa la taabto sida sidooyinka albaabada iyo qasabadaha.
 - Ilaa heerka suurtoogalka ah, hawl/wadeenada dhismaha ciyaaruhu waa inay:

- Kala duwaan wakhtiyada imaanshaha iyo bixitaanka ee shaqaalaha, ciyaartoyda iyo daawadayaasha si ay u yareeyaan iskugu imaanshahag albaabada laga soo galo, kuwa laga baxo iyo qolalka lagu nasto si loo raaco sharuudaha kala fogaanshaha jireed ee loo baahan yahay.
- Siiyaan albaabo soo galid/bixitaan oo kala duwan shaqaalaha, ciyaartoyda, iyo daawadayaasha.
- U qoondeeyaan meelo qorshaysan oo loogu talagalay maamulayaasha iyo tababarayaasha, markii aysan tababar ku jirin / ciyaarayn, si loo hubiyo joogteynta kala fogaanshaha jireed.

Tababarka iyo ciyaarta:

Ilaa intii suurtoagal ah, horyaalada, kulliyadaha/jaamacadaha, tababarayaasha waa inay:

- Qaadaan talaabooyin lagu hubinayo inay taabashada ay keliya dhex marto ka qeybgalayaasha/ciyaartoyda u baahan inay ciyaaraan ciyaarta. Tan waxa ka mid ah dhaafida is-gacan-qaadista, isku dhufashada baabacada, isku dhufashada feedhka / xusulka, isku dhufashada laabta iyo dabaaldegyada kooxeed.
- Kala fogeeyaan qalabka ciyaartoyda si looga hortago in ciyaartoydu toos isu taabtaan.
- Ku dhiirrigeliyaan ciyaartoyda inay qalabkooda keliya adeegsadaan marka ay suurogal tahay. Ka fogow ama yaree wadaagidda qalabka, marka ay suurogal tahay.
 - Qaar ka mid ah qalabyada muhiimka ah waxa laga yaabaa in uusan heli karin ciyaartoy walba. Marka ay lagama maarmaan tahay in la wadaago qalabyada muhiimka ah ama xaddidan, dhammaan sagxadaha qalabka la wadaago waa in loo nadiifiyaa oo jeermiska looga dilaa si joogto ah, sida ku habboon isboortiga (tusaale ahaan, inta udhaxeysa ciyaartooyda wadaagidooda, isbeddelka, muddooyinka, ama cayaaraha). Isticmaal jeermis-dilayaasha lagu daray [liiska ay ansixisay Wakaalada Illaalada Bay'ada \(EPA\)](#) ee loogu talagalay fayraska SARS-CoV-2 ee sababo COVID-19. Ma jiraan badeeco lagu qorayo waxaa loogu talagalay COVID-19 weli, laakinse badeecooyin badan waxay yeelanayaan qoraal ama warbixin laga heli karo websaydyada oo ku saabsan wax ku oolkooda wax kaqabashada fayraska korona ee aadanaha.
 - Nadiifi dhamaan qalabka si toos ah u taabanaya madaxa, wajiga iyo gacmaha adiga oo si taxaddir leh oo faahfaahsan u nadiifinaya.
- Ku dhiirrigeliyaan ciyaartoyda iyo/ama xubnaha qoyskooda in ay nadiifiyaan oo jeermiska ka dilaan qalabka mar walbo oo la isticmaalo ka dib, mar walba oo ay suuragal tahay.
- U oggolaadaan keliya tababareyaasha, hagamaasha iyo ciyaartoyga in ay ka qaybgalaan tababarka si loo hubiyo kala fogaanshaha jireed oo looga hortago dadku inay isku yimaadaan.
- Ku tababaraan ama ku ciyaaraan dibadda haddii loo qaban karo si nabdoon, markii aanay jabineyn wax amarada deegaanka. Qorsheeyaan wakhti ku filan oo u dhexeeya tababarada iyo cayaaraha si dhammaan dadka joogay tababarkii hore uga baxaan dhismaha ka hor inta aanay kooxda xigta soo gelin. Tani waxay

yaraynaysaa ku ururka iridaha galista iyo kuwa ka bixista iyo suuliyada waxayna bixinaysaa wakhti ku filan oo jeermiska looga dilo tasiilaadka/qalabka.

- Ka dalbadaan dadku in ay dhismaha ka soo galaan irrid la qorsheeyey ayna ka baxaan irrid la qorsheeyey. Ha xannibin irridaha laga baxo marka dab jiro. Isticmaal calaamado lagu hago socodka oo hal dhinac ah. Tixgeli jadwal u sameynta iyo socodsiinta wakhtiyada imaatinka dhismayaasha si loo yareeyo tirada badan ee shaqsiyaadka imanaya oona baxaya isla waqti.
- Joogaan dhismayaasha dibadooda (tusaale ahaan gawaadhida dhexdooda) illaa la gaaro wakhtiga loo qorsheeyay tababarka ama wakhtiga ciyaarta. Tani waxa ay u oggolaanaysaa dadka in ay ka baxaan dhismayaasha ka hor galitaanka waxana yaraynaysaa isku ururka. Ku dhiirrigeliyaan ciyaartoyda iyo qoysaska ciyaartoyda inay isla sidaa sameeyaan.
- Wixii ah hagd dheeraad ah oo ku saabsan barkadaha dabbaasha, ka eeg [Hagida Gaarka ah ee Dabaalashada Ruqsadda leh, Barkadaha Biyaha Diiran ee Ruqsadda leh iyo Garoomada Ciyaarta Taniska.](#)

Safarka:

Safarka ka bixida gobolka wuxuu kordhin karaa suurtagalnimada isu-gudbinta cudurka. Safarada diyaarada ee leh sugitaanka dheer, oo ay ka mid yihiin safarada gudaha dalka, soo gelida iyo ka bixida laftooda, ayaa waxay leeyihiin khatar dhexdhexaad ah oo la isugu gudbin karo cudurka. Waxaa walaac weyn iyo halis sareysa ah u baylah noqoshada qaadida cudurka inta lagu jiro ku sugida safarka ee garoomada diyaaradaha.

Horyaalada, kulliyadaha/jaamacadaha, hagayaasha, ciyaartoyda iyo tababarayaasha waxaa looga baahan yahay inay:

- Yareeyaan ku dhawaanshaha dadka ka baxsan kooxda safarka inta lagu jiro safar sugida:
 - Dhamaan xubnaha kooxda safarka oo ay ka mid yihiin shaqaalaha, ciyaartoyda, hagayaasha/tababarayaasha iyo darawalada, hadii ay saaran yihiin bas ama gaari, waa inay xirtaan maaskaro, gaashaanka wajiga ama waji daboolaha ayna hubiyaan ugu yaraan seddex (3) fuud inay u dhaxeeyso rakaabka ka mid ah kooxda safarka .
- Ku xaddidaan safarka dadka si joogto ah iskugu dhawaa oo loo arko inay yihiin shaqaale lagama maarmaan ah (sida, cayaartoyda, hagayaasha/tababarayaasha, shaqaalaha caafimaadka).
- Safarka hawada/diyaarada
 - Markaad awoodo, tixgeli duulimaadyada diyaaradaha gaarka ah halkii aad ka raaci lahayd safarka diyaaradaha ganacsiga ah. Safarka diyaaradaha ganacsiga ah waa inuu ahaadaa side/dad-qaade leh habab adag oo lagu xakameeyo infekshanka laguna hirgelinayo shuruudaha maaskaro gashiga ee guud.
 - Hayso gacmo nadiifiye 60-95% ka kooban aalkolo wakhti walba oo si joogto ah u isticmaal.

- Xiro maaskaro ama waji daboole mar walba oo yaree inaad iskaga saarto wax cunista ama wax cabista.
- Ka fogow inaad ku safarto isla diyaarad khaas ah oo ay la socdaan koox kale.
- Diiwaangeliyaan magacyada dhammaan rakaabka oo ay ku jiraan darawalka, duuliyaha iyo shaqaalaha diyaarada, oo ay la socdaan taariikhda iyo wakhtiga safarka iyo lambarka gaariga/liisanka, haddii ay khuseyso.
- U oggoladaan darawalada inay qaadi karaan kooxo safar oo badan haddii ay xiran yihiin maaskaro oo ay gacmaha jeermiska ka dilaan ka hor iyo ka dib markay wadaan koox walba. Gawaarida waa in la nadiifiyaa inta u dhaxaysa wadida koox walba iyada oo la raacayo [tilmaamaha/hagida gaadiidka](#).
- Ku dhaqmaan dhaqamada iska ilaalinta COVID-19 ka dib marka ay ku soo laabataan Oregon oo ay ka soo laabataan gobollada kale. Dhaqamada noocan oo kale ah waxaa ka mid ah nadaafadda gacmaha oo wanaagsan, kala fogaanshaha jireed, iyo xirashada maaskarada ama waji daboolaha, iyo hubinta in dhammaan shaqaalaha iyo ardayda ay leeyihiin nidaam adag oo ah is-kormeerida/soo-sheegida astaamaha COVID-19.
- U hoggaansamaan waxyaabaha soo socda marka ay ku laabanayaan xarunta isboortiga ka dib marka ay ka soo laabataan safar ka baxsan gobolka:
 - Haddii aad isku aragto [astaamaha COVID-19](#), la xiriir bixiye daryeel caafimaad si lagu baaro.
 - Lashaqee Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha ee Maxaliga ah haddii laguula soo xiriir ujeedooyinka raad-raacida.
 - Xiro maaskarada ama waji daboolada adigoo raacaya [Hagista Gobolka oo dhan ah ee Maaskrada, Waji Daboolada, Gaashaanka Wajiga](#).

Ilaa intii suurtoagal ah, horyaalada, kulliyadaha/jaamacadaha, hagayaasha, ciyaartoyda iyo tababarayaasha waa inay:

- Yareeyaan la kulanka dadka kale muddo ah 10 maalmood safarka kadib.
- Waa inay ujeedoodu noqoto inay safraan oo ay ciyaaraan isla maalintaas si ay uga fogaadaan dhixida habeenka, marka ay suuragal tahay. Marka ay noqoto dhixida habeenka ama safarka isla maalinta ah, waa in la tixgeliyaa qaadashada cuntada horey loo diyaariyey ama adeegga qolka. Haddii ay noqoto wax ka cunida makhaayada khiyaarka keliya ah, tixgeliyaan guri u qaadashada cuntada ama wax ku cunidda goobaha bannaanka ah inay noqdaan beddel la doorbidi karo.

Shirka Hay'adaha ee Pac-12

Kooxaha Shirka Pac-12 ee raba inay ku ciyaaraan Gobolka Oregon waa inay u soo gudbiyaan borotokoolo/hab-maamusyo Maamulka Caamifaadka Oregon (OHA) iyo xafiiska Gudoomiyaha si ay u hibiyaan in tababarka, tartanka iyo ciyaarta ay waafaqsan yihiin dhammaan hagista caafimaadka bulshada iyo shuruudaha marxallada/wajiga ay ku jirto degmada. Tababarka, tartanka iyo cayaarta ma bilaabmi karaan illaa marka borotokoollada/hab-maamusyada ay dib u eegaan oo ay ansixiyaan xafiiska Guddoomiyaha iyo OHA.

Isboortisyada/ciyaaraha Shirka Pac-12 ee lagu tababarto laguna ciyaaro gudaha Gobolka Oregon waa laga dhaafay dhammaan hagitaanada kale ee isboortiga/ciyaaraha ee la soo saaray, oo ay ka mid yihiin Hagista Kulliyadaha, Ciyaaraha Xirfada aan buuxin (Semi-Professional), iyo Ciyaaraha Horyaalada yar (Minor League Sports), Ku Soo Laabashada Ciyaarta oo Xaddidan. Kooxaha ciyaaraha/Isboortisyada Shirka ee Pac-12 waxaa laga filayaa inay u hoggaansamaan heerarka ay soo saareen horyaaldooda u gaarka ah ee ku saabsan tababarka, ciyaarida, raad-raacida, baaritaanka, karantiilida iyo wax kastoo kale ee khuseeya in la tixgeliyo, oo ay ka mid yihiin hab-maamuusyada ay oggolaadeen OHA iyo Xafiiska Guddoomiyaha. Munaasabadooyinka cayaaraha/isboortiyada Shirka ee Pac-12 ee lagu ciyaaro Oregon waa inay u hoggaansamaan [Hagista Wajiga/Marxallada Labaad ee Dib u Furista ee OHA – Hawlwadeenada Goobaha iyo Munaasabadooyinka](#).

Illo Dheeraad ah:

- [Calaamado aad dhejin karto](#)
- [Haqida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Waji Daboolada, Gaashaanka Wajiga](#)
- [Haqida CDC ee Maamulayaasha Jardiinooyinka iyo Xarumaha Madadaalada](#)

Helitaanka Dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Af Ingiriisiga, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida Turgumad, daabacada farta waa weyn ku qoran, ama farta indhoolayaasha (braille). Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.